IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Sannadka 13aad Muqdisho 25 Luulyo [illegible]

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga ioo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

### QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWTYNAHA J.D.S. L. 27 ee 30 Juun. 1985, Abuurid Kuliyad Takhasus iyo Cilmi Baaris Bog: 448

### QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISG. OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

DAWLADDA H. MUQDISHO, 24.1.84, Naado Dhul J/le Cabdulaahi Xaaji Yuusuf L. 199 » 454

DAWLADDA H. MUQDISHO, 24.1.84, Naado Dhul J/le Axmed Xuseen Canshur L. 200 » 455

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

DAWLADDA H. MUQDISHO, 24.1.84, Naado
Dhul J/le Yuusuf Jaamac Maxamed L. 201 » bis 455

DAWLADDA H. MUQDISHO, 11.2.84, Naado
Dhul J/le Liyaatik Ali iyo Liibaan M. L. 202 » 456

DAWLADDA H. MUQDISHO, 11.2.84, Naado
Dhul J/le Axmed Maxamed Yaaqub L. 203 » 457

DAWLADDA H. MUQDISHO, 11.2.84, Naado
Dhul J/le Liibaan Maxamud Axmed L. 204 » 458

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Maxamed Cartan Cali L. 205 » 459

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Kulmiye Mahad Geedi L. 206 » 460

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Salaad Cali Warsame L. 207 » 461

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Aadan Axmed Jaamac L. 208 » 462

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Cab/hi Maxamed Mire L. 209 » 463

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Yaxya Sheekh Maxamed L. 210 » 464

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Yuusuf Xersi Axmed L. 211 » 465

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Cawlawiya Sh. Nuur L. 212 » 466

DAWLADDA H. MUQDISHO, 14.2.84, Naado
Dhul J/le Cumar Axmed Maxamed L. 213 » 467

DAWLADDA H. MUQDISHO, Bed. Naado
Dhul J/le Cali Cilmi Barre L .214 » 468

DAWLADDA H. MUQDISHO, Bed. Naado
Dhul J/le Faaduma Maxamed Biixi L. 215 » 469

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85
Lumid Jeeg War. L. 340130 ku qoran
Maxamed Axmed Cali L. 216 » 470

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85 Lumid Jeeg War. L. 643651 ku qoran Maxamed Axmed Cali L. 217 » 471

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85 Lumid Jeeg War. L. 181031 ku qoran Maxmed Axmed Cali L. 218 » 472

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85 Lumid Jeeg War. L. 181032 ku qoran Maxamed Axmed Cali L. 219 » 473

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85 Lumid Jeeg War. L. 0085483 ku qoran Aadan Maxamed Maxamuud L. 2[illegible] » 474

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85 Lumid Jeeg War. L. 0257148 ku qoran Siraaji Maxamed Xaashi L. 221 » 475

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85 Lumid Jeeg War. L. 0118447 ku qoran Siraaji Maxamed Xaashi L. 222 » 476

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.7.85 Lumid Jeeg War. L. 0265767 ku qoran Siraaji Maxamed Xaashi L. 223 » 477

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.7.85, Lumid Buug Keyd L. 15328 ku qoran Cali Daahir Dalmar L. 224 » 478

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.7.85, Lumid Jeeg.War. L. 0133352 ku qoran Maxamed Cabdullaahi Faarax L. 225 » 479

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.6.85, Lumid Jeegag Lumay L. 60.009-600876-601140 ku qoran, loona cusbooneysiiyo Ismaaciil Cali L. 226 » 480

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 2.7.85, Lumid Jeegag L. 0232243-0033533 ku qoran Xuseen Cabdiraxmaan Maxamuud L. 227 » 481

MAXKAMADDA G. W/GALBEED,25.6.85, Lumid Jeeg.War. L. 0158084 ku qoran Cumar Cabdullaahi Cawad L. 228 » 482

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.7.85, Lumid Jeeg War. L. 0133429 ku qoran Xaawo Shire Maxamed L. 229 » 483

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.7.85, Lumid Jeeg War. L. 337246 ku qoran Canab Aadan Cali L. 230 » 484

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 2.7.85, Lumid Buug Kayd L. 4675 ku qoran Faaduma Xasan Cali L. 231 » 485

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 2.7.85, Lumid Jeeg War. L. 06444 ku qoran Madiina Xuseen Maxamed L. 232 » 486

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.7.85, Lumid J. War L. 068659 ku qoran Cabdulqaadir Cusmaan Cali L. 233 » 487

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 27 ee 30 Juunyo 1985 Abuurid Kuliyad Takhasus iyo Cilmi Baaris Madaxweyne

## MADAXWEYNAHA JDS

— Asagoo Arkay qod. 82 ee DaDstuurka.
— Asagoo Arkay Sharciga JUS ee lam. yahay 72
— Asagoo tixgeliyey baahida loo qabo in JUS laga abuuro Kulliyad Jaamacadda ka abaabusha barnaami jiyo Takhasus lagana bixiyo shahaadooyin Sare iyo Dibloomooyin Takhasus.
— Markii uu tixgeliyey ra'yiga Guddiga Sare ee JUS.

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeerka Soo Socda—

### Qodobka 1aad
Abuurista Kuliyadda Takhasuska iyo Cilmi Baarista

Waxaa la abuuray Kuliyad lagu magacaabo «Kulliyadda Takhasuska iyo Cilmi Baarista» ee ka mid noqoneysa Kulliyadaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad
UJEEDDOOYINKA

Ujeedooyinka loo abuuray Kulliyadda ku xusan qod. 1aad ee Xeerkan waa kuwa soo socda.

— Inay dejiso, hirgeliso barnaamijyada Takhasusaadka kala duwan ee JUS ee lagu qaadanaayo Shahaadooyinka Jaamacadda ee heerka 2aad (Masterate level) iyo heerka 3aad (Ph.D. Level) iyo Diploomooyinka Takhasuska (Post Graduate Dip.)

— Inay abuurto (ama kuwe jira la kaashato) xarumo ama kooxo Cilmi Baaris ee gacan ka geysta fulinta siyaasadda Jaamacadda Ummadda ee la xiriirta Takhasuska iyo Cilmi Baarista.
Xarumahaasi ama kooxahaasi waxay hoos imaanayaan ama ka baxsanaan karaan Jaam. U. Soomaaliyeed.
— Inay la socoto, talana ka bixiso barnaamijyada Takhasuska ee la siinaayo Macallimiinta JUS ee «Jooga»

ama wax ku barta Jaamacadaha Dibadda.

— Inay hormariso Tacliinta Sare iyo Cilmi Baarista Jaamacadda iyadoo waafajineysa himilooyinka horumarka Q.

Qodobka 3aad

Wax allaale wixii ku saasan Cilmi Baarista, Kulliy adda waxay la kaashan doontaa akadeemiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta iyadoo la dhowrayo Siyaasadda Guud ee u degsan hay'addaas.

Qodobka 4aad

Muddada Takhsuska

Muddada uu socon doono barnaamijjka Takhasuska waa sida hoos ku xusan

— Barnaamijka loogu tala galay shahaadada heerka 2aad (Masterate) in lagu qaato wuxuu noqon doonaa ugu yaraan labo sano tacliineed oo ka dambeysa shahaadada heerka 1aad.

(Masterate) in lagu qaato wuxuu noqon doonaa ugu yaraan labo sano tacliineed oo ka dambeysa shahaa dada heerka 1aad.

— Barnaamijka loogu tala galay inl lagu qaato shahaad ada heerka 3aad (Ph.D.) wuxuu socon doonaa ugu yaan 3 sano tacliimeed oo ka dambeyn shahaadada heerka 2aad (Masterate).

— Barnaamijka loogu tala galay Dibloommka Takhasuska (Post Graduate) wuxuu socon doonaa ugu yaraan hal sano tacliimed kaddib qaadashada shahaadada heerka koowaad.

Qodobka 5aad

Shuruudaha qaadashada ardayda Takhasuska

Barnaamijka Takhasuska waxaa isku qori kara arday kasta oo buuxiya shuruudaha soo socda:-

— Inuu haysto shahaadada heerka 1aad ee ay bixisay Jaamacadda Ummadda ama Jaamacad kale oo la aqoonsanyahay una dhiganta shahaadada h/ka 1aad

— In darajada uu ku haysto shahaadadiisa aysan ka ya

raan heerka «fiican» oo ku xusan qod. 26 ee Jaamacadda Ummadda (Xeer lam. 93).

— Waa inuu ka gudbaa Imtixaan hubsiimo ah, haddii loo baahdo.

Qodobka 6aad

Barnaamijka Takhasuska

Barnaamijka Takhsuska kasta waxaa dejin doona, si wada jir ah, Kulliyadda Takhasuska iyo Cilmi Baaris ta iyo Kulliyadda ku shaqada leh, Cilmiga lagu soo Takhasusaayo.

Barnaamijkaas waxa la fulin karaa markii uu oggo laado Guddiga Sare ee Jaam. Ummadda Soomaaliyeed.

Qodobka 7aad

Si loo qaato shahaado ama Diblooma Takhsus, waa in ardaygu fuliyo shuruudaha soo socda:

b) In uu qaato ugu yaraan labo xilli waxbarasha duruus heer Takhasus ah, kuna gudbo imtixaanada Ta khasuska (celcelis ahaan) ugu yaraan derejada «fiican» ee ku xusan qod. 25 ee xeerka JUS (xeer lam. 93) marka uu qaadanaayo shahaadada heerka 2aad (masterate) ama Diblooma takhsus, marka uu doonayo in uu qaato shahaadada heerka 3aad (Ph.D.) waxaa laga doonayaa 3 xilli waxbarasho lagu qaadanaayo duruus heer takha sus ah, kuna gudbo imtixaanka duruusta marka la isku celceliyo dereja «fiican».

t) Duruusta iyo Imtixaanaadka ka sokow ardayga qaadanaayo shahaadooyinka heerka labaad ama saddexaad waxaa laga doonayaa in uu sameeyo shaqo Cilmi Baaris ku dhamaato qoraal Tesi, uuna ku guuleysto difaaceeda.

j) Ardayga qaadanaya shahaadada heerka 3aad (Ph.D.) waxaa laga doonayaa in uu gudbo imtixaanaad ka ka sokow imtixaan af qalaad ee aan ahayn kan u teesigiisa ku qoray.—

Qodobka 8aad

Xubnaha Sare ee Kulliyadda

Xubnaha Sare ee Kulliyadda Takhasuska iyo Cilmi Baarista waxa ay ka kooban yihiin Guddiga Kulliyadda iyo Regtor Xigeenka J.U.S.

## Qodobka 9aad

### Xubnaha Guddiga Kulliyadda

— Rektor Xigeenka J.U.S. Guddoomiye

— Hormuudyada Kulliyadaha ee leh barnaamijyo takhasus — Xubin

— Labo ka mid ah madaxda Xarumaha C. Baarista aan Jaamacadda Ummadda ka tirsan — Xubin
— Guddoomiyaha Akademiyada G.F. iyo S. — Xubin
— Guddoomiyaha Maktabada Qaranka — Xubin
— Buug Xannaaniyaha Jaam. Um. Soo/yeed — Xubin
— Xoghayaha Waxbarashada ee Kulliyadda — Xubin

## Qodobka 10aad

### Hawlaha Guddiga Kulliyadda

Guddiga Kulliyadda wuxuu yeelanayaa hawlaha soo socda.—

— Inuu hubiyo fulinta Siyaasadda Jaamacadda ee la xiriira Takhasusyada iyo Cilmi Baarista.
— Inuu talo ka soo jeediyo abuuridda barnaamijyada Takhasuska ee lagu qaadanayo shahaadooyinka ku xusan qod. 2aad ee Xeerkan.

— Inuu talo ka soo jeediyo abuuridda xarumo Cilmi B/s.
— Inuu wax ka bedelo ama dib u habeyn ku sameeyo barnaamijyada Takhasusyada, isagoo tixgelinaya ta lada Macallimiinta ku hawlan waxbarashada.
— Inuu hubiyo fulitaanka mashaariicda Cilmi Baarista isagoo tixgelinaaya talada Guddiga Cilmi Baarista ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.—

— Inuu dib u habeeyo nidaamka soo gelitaanka Kul/da.
— Inuu dhiirgeliyo isku duwana Cilmi Baarisyada Maa dooyinka kala duwan (Interdisciplinary) ee Wax/da.
— Inuu oggolaado Miisaaniyadda Kulliyadda.

— Inuu kala taliyo Rektor Xigeenka J.U.S. Arrin kasta oo la xiriirta habsami u socodsiinta hawlaha Kul/da
— Inuu u ogolaado isku qorid waxbarasho Takhasus

ama mid hore uga socday oo loo dheel ee [illegible] Ardada doonaya shahaado ama takhasus Sare iyado la raacayo xeerarka guddiga Sare [illegible] soo Saaro.—

— Isagoo raacayo talada Kulliyadaha Takhasuska iyo Cilmi Baarista oo dhegeysatay talada Guddiyada Takhasuska iyo Cilmi Baarista, wuxuu magacaabayaa la-taliyayaal iyo imtixaanayaal takhasus Sare.

— Isagoo raacaya xeerar u degsan JUS wuxuu talo ku saabsan bixinta shahaadooyinka ama Diblomo takhasus u soo jeedinayaa Siyaasadda Guud ee la xiriirta xanaaannaynta ardayga waxbarashada heerarka Sare ah sameynaya (Sida jiifka, raashinka daawada IWM).—

## Qodobka 11aad

## Rektar Xigeenka J.U.S.

Rektor Xigeenka J.U.S. Ayaa noqonaya sarkaalka ugu sareeya maamulka iyo waxbarashada Kulliyadda, waxaanna kaalmeynaya madaxda Dugsiyada Takhasus qaybaha Kulliyadda ee takhasuska ka socdo, iyo madaxda Xarumaha Cilmi Baarista.

## Qodobka 12aad

## Hawlaha Rektor Xigeenka J.U.S.

— Raktor Xigeenka JUS oo mas'uul uga noqonaya arrimaha Kulliyadda Guddiga Sare, isagoo hoos imana ya Rektorka JUS waxay guud ahaan hawlihiisa noqonayan fulinta Siyaasadda Waxbarashada Takhasusyada, Cilmi Baarista lagu abuurayo kaadir haysta shahaadooyinka darajada 2aad iyo 3aad iyo Diblom tkhasus ah, wuxuu u matalaya Kulliyadda hawl kasta

— Wuxuu guddoominayaa shirarka Guddiga Kulliyadda guddiga qalin Jebinta la saxiixayaa Rektorka iyo Diiwaaniyada shahaadooyinka ee Kulliyada bixiso.

— Wuxuu soo jeedinayaa magacaabidda macallimiinta, Cilmi Baarayaalka ku soo biiray Kulliyadda ama xarumaha waxbarashada iyo kuwa Cilmi Baarista isa

goo dhegeystay ama la tashaday Hormuudka Kulli yadda takhasuskaasi khuseeyo ama madaxda xaru maha Cilmi Baarista.

— Wuxuu ilaalinayaa maaliyadda Kulliyadda.
— Wuxuu mas'uul ka yahay dhowrista habsami u socod siinta hawlaha Kulliyadda waafaqsan sharciga xeer ka iyo nidaamka hoose.

## Qodobka 13aad

## Xubnaha Maamulka

Rektor Xigeenka JUS ka sokow, Kulliyadda waxay yeelanaysaa xubnaha maamulka ee hoos ku tilmaaman
— Agaasimaha Maamulka Kulliyadda.
— Xoghayaha waxbarashada Kulliyadda ahna Diiwaan iyaha Kulliyadda

— Kaaliyaha Agaasimaha Kulliyadda.
— Kaaliyaha Xoghayaha Kulliyadda

## Qodobka 14aad

## Dhaqan Gelin

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib markii lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Juun 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdulaahi Xaaji Yuusuf uu soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.4.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 33X20 kuna fadhiya 760 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 742/78

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Caydaruus

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ras miga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 24 Gen. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cisman

L. 199

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA MAAMULKA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Xuseen Canshuur uu soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 13.12.83 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, DegmadaWadajir, Qaabkiisuna yahay Rettangolar, Addimihiisuna yihiin 20X40 kuna fadhiya 800 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad

Koonfur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar. waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalnita lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.
Muqdisho, 24 Gen. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 200

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## WAAXDA MAAMULKA DHULKA RASMIGA AH

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Sha. Yuusuf Jaamac Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.9.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar gees isla eg Addimihiisuna yihiin 100X100 kuna fadhiya 10.000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:
Waqooyi Waxaa ka xiga Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 24-26 W.

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 21 W.

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 27 W.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ras miga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 24 Gen. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cisman

L. 201

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA MAAMULKA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Liyaakat Cali iyo Liibaan Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 27.10.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawlad eed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Yaaq Shiid Qaabkiisu na yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 100X50 ku na fadhiya 5.000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ras miga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cisman

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA MAAMULKA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Axmed Maxamed Yaaquub uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Boondheere Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X10 kuna fadhiya 200 MDH.—

SOOHDIMAHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ras miga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cisman

L. 203

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Liibaan Maxamuud iyo Liibaan Bashiir uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 1.11.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Yaaq Shiid Qaabkiisuna yah ay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 50X100 kuna fa dhiya 5.000 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhul rasmi ga ah ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa mu do 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 204

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Cartan Cali uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D. Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 2.6.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees isla eg Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Maxamuud Cartan
Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Faaduma Abuukar

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhul rasmiga ah ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa mudo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 205

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Kulmiye Maxamed Geeddi uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/Hoose Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 25.10 78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Trabesiyo Addimihiisuna yihiin 20 + 25X25 kuna fadhiya 562,50 Mh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhul rasmiga ah ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa mudo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 206

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Salaad Cali Warsame uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah eeD/H. Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 12.4.82 uu ku wey diistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimi hiisuna yihiin 24X28 kuna fadhiya 672 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Asli Diini

Koonfur Waxaa ka xiga: W. Bender Qasim,

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhul rasmi ga ah ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa mu do 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 207

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Aadan Axmed Jamac uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/H. ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 19.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muq. Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees isla eg Addi mihiisuna yihiin 27X27 kuna fadhiya 729. MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri dad kale leh

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri Dad Kale

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhul rasmi ga ah ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa mu do 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 208

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdulaahi Maxamed Hirad uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D/H. ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 29.11.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Retangolare Addimihiisuna yihiin 9,5X29 kuna fadhiya 190 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhulkiisii hore

Koonfur Waxaa ka xiga: Wadada Ummadda

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B ar i Waxii ka xiga: Dhul Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhul rasmiga ah ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa mudo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 209

DAWLADDA HOOS EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Yaxya Sh Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D.H· ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 4·2.84 uu ku we ydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg· Boondheere Qaabkiisuna yahay Rettangolare Ad dimihiisuna yihiin 12X8 kuna fadhiya 96 MDH·—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: W· Nasiib Buundo

Koonfur Waxaa ka xiga: Guriga Suufi Cali

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiba: Guri Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshaddo dhulka oo taal Waaxda dhulka ras miga ah ee D·H· ee Xamar waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta la gu soo qor Buugga Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 14 Feb· 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom· Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 210

DAWLADDA HOOS EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Yuusuf Xersi Axmed iyo Sooshi uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D.H. ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 1.8.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. W. Afgooye Qaabkiisuna yahay Trabeso Addimihiisuna yihiin 112;207;200;65;118/= kuna fadhiya 27.144/= MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi Waxaa ka xiga: | Dhul Dad |
| Koonfur Waxaa ka xiga: | W. Afgooye |
| Galbeed Waxaa ka xiga: | Dh. Bashiir Yarow |
| B a r i Waxaa ka xiga: | Dh. Qabdulqaadir |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshaddo dhulka oo taal Waaxda dhulka rasmiga ah ee D.H. ee Xamar waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qor Buugga Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 14 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 211

DAWLADDA HOOS EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Calayiya Sh· Nuur Xuseen uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee D·H· ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 4.8·83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg· Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettango lare Addimihiisuna yihiin 24x12 kuna fadhiya 288 MDH

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshaddo dhulka oo taal Waaxda dhulka ras miga ah ee D·H· ee Xamar waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta la gu soo qor Buugga Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 14 Feb· 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom· Maxamuud Cabdi Cismaan

DAWLADDA HOOS EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cumar Axmed Maxa muud uu u soo qortay arji Waaxda dhulka rasmiga a ee D.H. ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.1.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkeeduna yahay Afar Gees isla eg Addimihiisuna yihiin 20x20 kuna fadhiya 400 M2

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 1108

Koonfur Waxaa ka xiga: W. Jaalle Siyaad

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 1107

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshaddo dhulka oo taal Waaxda dhulka ras miga ah ee D.H. ee Xamar waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta la gu soo qor Buugga Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 14 Feb. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 213

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J/le Cali Cilmi Barre maalintii taariikhdu ahayd 21.4.59 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Deg. Hodon Qaab kiisuna ahaa Afar Gees isla eg Addimihiisuna ahaayeen 50X50 kuna fadhiyey 2500 Mdh.— Loona qaaday dan Guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa 610559 ee 4.8.59 oo ka soo baxday Xafiiska waxay usu bedeshay sida hoos ku Tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Wadajir Qaabkiisu waa Afar Gees isla eg Addimihiisuna yihiin 50X50 kuna fadhiya 2500 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi Waxaa ka xiga: | Jid yar |
| Koonfur Waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 148 |
| Galbeed Waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 148 |
| B a r i Waxaa ka xiga: | Waddo |

Muqdisho,24 Gen. 1984
AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 214

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

## BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J/le Faaduma Maxamed Biixi maalintii taariikhdu ahayd loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Deg. Hodon Qabkiisuna ahaa Rettanglare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

loona qaaday dan guu d awgeed looguna bedelay dhul kale oo kuyaal Muqdisho Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naqshaddii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG/3.23.470 ee ahayd 1977 oo ka soo baxday xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Kaaraan Qaabkiisu waa Trabesiyon Addimihiisuna yihiin 30X30 kuna fadhi ya 600 MDH.—

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 387 B.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 383 B.

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lam. 386 B.

Muqdisho,24 Gen. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 215

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu ahaa 340130 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iska lahaa Maxa med Axmed Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 006140 taariikhdeeduna tahay 2.7.85 ee Ban kiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed lanta X. gud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 340130 ee ku qoran Maxamed Axmed Cali ayna ku jirto Sh.So. 20.000.—

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyoKeydka laanta Boosaaso ee kor ku timaaman una sameeyso mid la mid ah mark ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 6.7.85

GARSOORAHA MAXGAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 216

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu

ahaa 643651 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa Maxamed Axmed Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 006140 taariikhdeedu tahay 2.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta X. Gud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 643651 eeku qoran Maxamed Axmed Cali ayna ku jirto Sh.So. 50.000.—

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyoKeydka laanta Boosaaso ee kor ku timaaman una sameeyso mid la mid ah mark ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 6.7.85

GARSOORAHA MAXGAMADDA GOBOLKA BANADIR

Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 217

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu ahaa 181031 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Maxam ed Axme Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 006140 taariikhdeedu tahay 2.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta X. Gud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 181031 ee ku qoran Maxamed Axmed Cali ayna kujirto Sh.So. 100.000.—

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyoKeydka laanta Boosaaso ee kor ku timaaman una sameeyso mid la mid ah mark ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 6.7.85

GARSOORAHA MAXGAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 218

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu ahaa 181032 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Maxam ed Axmed Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 006140 taariikhdeedu tahay 4.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed lanta X. Guud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 181032 ee ku qoran Maxamed Axmed Cali ayna ku jirto Sh.So. 100.000.—

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyoKeydka laanta Boosaaso ee kor ku timaaman una sameeyso mid la mid ah mark ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 6.7.85

GARSOORAHA MAXGAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 219

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu ahaa 0085483 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kismaayo kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 35.000 uu iska lahaa Aadan Maxamed Maxamuud sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 006194 taariikhdeedu tahay 3.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soo/ed lanta X. Gud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 0085483 ee ku qoran Aadan Maxamed Maxamuud ayna ku jirto Sh.So. 35.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Kismaayo ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah laga kenin.

Muqdisho, 6.7.85

GARSOORAHA MAXGAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 220

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu ahaa 0257148 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wadajir kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Siraaj Maxamed Xaashi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00352 taariikhdeedu tahay 4.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed lanta Wadajir

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIREY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 0257148 ee ku qoran Siraaj Maxamed Xaashi ayna ku jirto Sh.So. 100.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Wadajir ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah la ga keenin.—

Muqdisho, 4.7.85

GARSOORAHA MAXGAMADDA GOBOLKA BANADIR
Dr. Cabdulaah Maxamed Maax

L. 221

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu ahaa 0119447 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta W/dhiigley kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa Siraaj Maxamed Xaashi Sh. sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 000305 taariikhdeedu tahay 4.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka S/ed lanta W/gley.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIREY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 0119447 ee ku qoran Siraaji Maxamed Xaashi Sh. ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta W/dhiigley ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah la ga keenin.—

Muqdisho, 6.7.85

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaah Maxamed Maax

L. 222

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg Dhumay uu lambarkiisu ahaa 0265767 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Hodon kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Siraaji Max amed Xaashi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay —— taariikhdeedu tahay 4.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Hodon

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lamb. 0265767 ee ku qoran Siraaji Maxamed Xaashi ayna ku jirto Sh.So. 100.000

WUXUU FARAYAA

ee kor ku tilmaaman una sameeyso mid la mid ah mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah la ga keenin.—

Muqdisho, 6.7.85

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 223

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd Dhumay oo lambar kiisu ahaa 15328 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 9.120.00 uu iska lahaa Cali Daahir Dalmar sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 000437 taariikhdeedu 2.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed lanta Sad/d.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd lamb 15328 oo ku qoran magaca Cali Daahir Dalmar ayna ku jirto Sh.So. 9.120.00

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad ubedelo Cali Daahir Dalmar B. keyd. ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu faafiyay rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga kenin

Muqdisho, 4.7.85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 224

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lamb/su ahaa 0133352 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Qardho kuna qoran lacag dhan Sh.So. 42.000 uu iska lahaa Maxamed Cabdulaahi Faarax sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 06311 taariikhdeedu tahay 6,7,85 ee Ba nkiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed lanta X.G.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9,9,85

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegaga War. lam 0133352 ee ku qoran Maxamed C/hi Faarax ayna ku jir to Sh.So. 42.000

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Qardho ee kor ku tilmaaman una sameeoy mid la mid ah mark ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee J.D.S, Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga kenin
Muqdisho, 7,7,85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 225

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

Ku: Xafiiska Baafinta Rasmiga ah ee Xamar
UJ: Baafin Jeegag Lumay

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegaga War. kala ah 60,1009 ee ay ku qoran tahay Sh.So. 20.000 iyo J/W No. 600876 kuna qorayd Sh.So.20.000 kuna Qoranyaha labadaas Jeeg Saleebaan Xirsi Dhuxul Tr, 3.4.85 iyo J/W ee 601140 kuna qornayd Sh.So. 20.000 kuna qoran yahay Maxamed Adar Kaahin Tr, 4.4.85 lagana sameeyey iyo 60096 Sh.So, 15000 kuna qoran Shugri Aadan Cashuur tr, ahayd 3,4,85 Lagana sameeyay Laanta Burco,

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka lanata Burco

HADDUU ARKAY: Qod.69,65 wumid Jeegaga War. ee kor ku xusan ee ay ku qoran yihiin dadka ujeedada sare ku xusan.—

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegagas J/le Ismaaciil Cali Food markii ay ka soo wareegto 20 casho gudahood lagu na shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa lagaa codsanayaa

In Jeegagas cusub ee la sameyndoono gacanta laga Saaro J/le Ismaaciil Cali Food iyadoo la sugayo muda da kor ku xusan,

Guddoomiyaha Max/da Gobolka Togdher Burco
Burco, 10.6.85
L. 226

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

Ku: Xafiiska Faafinta rasmiga ah ee D· Xamar
UJ: Baafin Jeegaga Wareega ee Lumay

HADDUU ARKAY: DACWADA ku saabsa baafinta Jeegaga Lumay

HADDUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga iyo keydka Burco

HADDUU ARKAY: Qod. 69 65 Lumid Jeegaga War· ee kala ah 0232243 Sh.So. 100·000 kuna qoran yahay Keeysa Maxamed Warsame lam. 8·6·85 iyo J/W 0033533 Sh·So· 50·000tr, 23/6/85 kuna qoran yahay Maxamed Aw Jaamac Cabdi·

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaga War· J/le Xuseen Cab/raxmaan Maxamuud markii ay ka soo wareegto 20 Casho gudahood laguna shaaciyo X· Faafinta Rasmi ga ah ee Dawladda·—

Waxaa lagaa codsanayaa

In Jeegagaas War· ee la sameyn doono gacanta la ga saaro J/le Xuseen Cab/raxmaan Maxamuud iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

BURCO, 2·7·1985

Guddoomiyaha Max/da Gobolka Togdher Burco

Dr· Abuukar Islow Cumar

L· 227

Maxkamadda Gob. W/Galbeed ee Hargeysa

UJEEDDO: Digireeto Cusboonaysiin Jeeg War. oo Lumay Lambar yahay 0158084.

Guddoomiyaha Maee/da Gobolka W/galbed Hargeysa

Arjiga uu soo qortay J/le Cumar Cabdulaahi Cawad ee ku taariikhaysan 23kii Juun 1985 uuna ku codsanayo Cusbooneysiinta Jeegga War. ee sare ku qoran ee lumay

MARKUU ARKAY: Cadeynta Bankiga ee lambarkee du yahay 0905 ee taariikhdeeduna tahay 24.6.85 ayna ku cadeeyeen in Jeegaas lambarkiisu sare ku qoran yahay la sameeyey 22,6.85 lacagtiisuna tahay 50,000 lagana sa meeyey laanta Hargeysa, loona sameeyey Cumar Cab dillaahi Cawad Taararka Faafnta ah ee ku kala taarii khaysan 23,6,85 ee Bankigu laamihiisa u wada diray qod 69-70 ee X.L.Y, 2 ee soo baxay 9,9,65kii In Lacagta Jee gaas uu ku qoran yahay iskana leeyahay Cumar Cabdil laahi Cawad.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga War. ee Lumay ee lam barkiisu yahay 0158084, loona cusboonaysiiyo Cumar Cabdillaahi Cawad.

Cusboonaysiintaas Gacanta laga saa-ro Jaalahaas ama cid awood Buuxda ka haystada, mud do 15 casho gudahood ah ka dib maalinta Go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee laanta Madaxtooya da J.D. Soomaaliyeed.—

Waxaa la farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Hargeysa in lagu dhejjiyo Nuqulka Go'aanka Bankiga Iridiisa si ciddii haysata Jeegaas lumay ee kor lagu kansal gareeyay uga soo qorato caba sho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 25.6.1985

Guddoomiyaha Maee/da Gobolka W/galbed Hargeysa
Ibraahim Faarax Maxamed
Kaaliyaha Max/da Gobolka W/Galbeed ee Hargeysa
Maxamuud Jaamac Cigaal

L. 228

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga dhumay uu lambarkiisu ahaa 0133429 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qardho kuna qoran lacag dhan Sh.So. 42.000/= uu iska lahaa Xaawo Shire Maxamed ... ku cad warqadda lambarkeedu yahay 080933 taariikhdeeduna yahay 17.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud,

HADDUU ARKAY: Qod. 39 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Lam. 0133429 ee ku qoran Xaawo Shire Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 42.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Qardho u badalo Jeegga kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah eeJDS, haddii inta ka horaysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.7.1985

L. 229

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J/wareega dhumay uu lambarkiisu ahaa 337246 lagana soo saaray Bankga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna qoran lacag dhan Sh.So. 15.000/= uu iska lahaa Canab Aadan Cali sida ku uad warqadda lambarkeedu yahay ——— taariikhdeeduna tahay 15.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 327246 ee ku qoran Canab Aadan Cali ayna ku jirto Sh.So. 15.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Boosaaso u badalo J/wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.5.1985

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 230

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 4675 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Wadajir kuna qoran lacag dhan Sh.So. 62.200/= uu iska lahaa Faadumo Xasan Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00034[illegible] taariikhdeedu 23.6.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 4675 oo ku qoran magaca Faadumo Xasan Cali ayna ku jirto Sh.So. 62.200/=.

### WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir u badalo Faadumo Xasan Cali Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 2.7.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maay

L. 231

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 06444 laga na soo saaray Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed, kuna qoran lacag dhan Sh.So. 18.800/= uu iskalahaana J/le Madiina Xuseen Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 2704 taariikhdeeduna tahay 2.7.85 ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabiiyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 06444 kuna qoran Madiina Xuseen Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 18.800/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed u sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30/= maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.7.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 232

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg War· Dhumay oo lamb/su ahaa 068659 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Sad/d kuna qoran lacag dhan Sh·So· 10·000 uu iska lahaa J/le Cab/dir Cusmaan Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu — taariikhdeedu tahay 8·6.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad·

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegaga War· lam 068659 kuna qoran C/qaadir Cusmaan Ciise ayna ku jir to Sh·So· 10·000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u bedelo Jeegg War. ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaa bo maalinta lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J·D·S· Haddii inta ka horaysa aan wax is horiag ah laga kenin

Muqdisho, 7·7·85

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr· Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 233

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J/Wareega dhumay uu lambarkiisu ahaa 0085615 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna qoran lacag dhan Sh.So. 43.500/= uu iska lahaa Cabdi-casiis Jaamac Gayre sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay ——— taariikhdeeduna tahay 14.7.85 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.65;

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0085615 ee ku qoran Cabdi-Casiis Jaamac Geyre ayna ku jirto Sh.So. 43,500/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo u badalo Jeegga kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.7.1985

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 235

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

UJ: Baafin Jeegga War. ee Lam. 0029345 ee Lumay.

(Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Lumid Jeegga Wareega ee kor ku xusan;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco ee taariikh 23.6.85;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65,) Lumid Jeegga Wareega ee Lam. yahay 0029345 kuna jirtay Sh.So. 30,500/= kuna qoran yahay Jaalle Cali H. Cabdilaahi Axmed lagana sameeyey L. Burco Tr.12.3.85;

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan J/le Cali H. Cabdillaahi Axmed markii ay ka soo wareegto muddo 20 casho ahi laguna Shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro J/le Cali H. Cabdillaahi Axmed iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, 24.6.1985

Guddoomiyaha Max. G/Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Max. G/Togdheer Burco
(J. Cabdillaahi Bille)